

Liiska U Qalanka Xaashida Macluumaadka Talaalka COVID-19

Caymisyada Ohio waxay siiyaan talaalka COVID-19 cidda doorata inay is talaasho. Maadaama oo uu yar yahay, talaalka marka kowaad waxaa la siiyey dadka ku jira khatarta ugu badan, taas oo ku xidhan da'da, shaqada, xaalada nolosha, ama taariikhda caafimaad. Hoos ka eeg sida aad u ogaanayso hadii aad u qalanto talaalka COVID-19 ee Ohio.

U qalanka waxa la kordhin doonaa Maarso 29 oo waxaa laga dhigi doonaa cid walba oo si amaan ah u qaadan karta talaalka. Si aad u qabsato balan marka aad u qalanto, booqo Xalka Maamulida Talaalka (Vaccine Management Solution, VMS) ee Ohio.

U QALANKA DA'DA KU SALAYSAN

- Dadka ah **50 jirka ama ka wayn**.
- Dadka ah **40 jirka ama ka wayn**, laga bilaabo Maarso 19.

U QALANKA KU XIDHAN MEESHA UU QOFKU DEGAN YAHAY

- Dadka deggan **guryaha xanaanada**.
- Dadka deggan **xarumaha kaalmada nolosha**.
- Bukaanaada **isbitaalada xanuunada maskaxda ee gobolka**.
- Dadka qaba laxaad la'aanta korniinka ee ku jira **guryo kooxeed, xarumaha deganaanshaha, ama xarumo**.
- Dadka qaba khalkhalka xanuunka maskaxda, oo ay jiraan khalkhalka isticmaalka balwadaha, deggan **guryo kooxeed, xarumaha deganaanshaha, ama xarumaha**.
- Dadka deggan guryaha **gobolka ee ciidamada hawlgabay ee Ohio**.

U QALANKA CAAFIMAADKA KU SALAYSAN

- Dadka uurka **leh**.
- Dadka qaba **macaanka nooca 1**.
- Dadka qaba **macaanka nooca 2**.
- Dadka qaba xanuunka amyotrophic lateral sclerosis (**ALS**)/**Lou Gehrig's**.
- Dadka qabaxanuunka **heerka ugu danbeeya ee kalyaha (kalida)**.
- Dadka laga badalay **dhuuxa lafta**, mararka qaar loo yaqaan qaliinka badalka hematopoietic ama galinta stem cell, ee ku jira badi daawaynta kansarka ama dhiig yaraanta qaar.
- Dadka qaba **kansarka**, laga bilaabo Maarso 19.
- Dadka qabaxanuunka **kalida ee mudada dheer (chronic kidney disease, CKD)**, laga bilaabo Maarso 19.
- Dadka qaba **xanuunka mudada dheer ee chronic obstructive pulmonary disease (COPD)**, laga bilaabo Maarso 19.
- Dadka qaba **wadne xanuunka**, laga bilaabo Maarso 19.
- Dadka **cayilan**, laga bilaabo Maarso 19.
- Dadka qaba xanuunada qaar oo ay qabeen ilaa markii ay dhasheen ama ku qaaday intii ay yaraayeen. Xaaladaha u qalmida ee aan lagu sheegin kor ee ku jira qaybtan:
 - **Dhiig yaraanta sickle cell**.
 - **Down syndrome**.
 - **Cystic fibrosis**.
 - **Muscular dystrophy**.

- **Cerebral palsy.**
- **Spina bifida.**
- Waxyeeladawadnaha ee aadka u daran ee u baahan daryeel caafimaad oo gaar ah.
- **Phenylketonuria (PKU), Tay-Sachs,** iyo khalkhalka kale ee naadirka ah ee waalidka laga dhaxlay ee **metabolic (nololeed).**
- **Epilepsy** suuxdinta joogtada ah leh; **hydrocephaly; microcephaly,** iyo khalkhalka kale ee **neerfaha ee aadka u daran.**
- **Turner syndrome, fragile X syndrome, Prader-Willi syndrome,** iyo khalkhalka kale ee **hidde-sidaha ee aadka u daran.**
- **Xiiqda daran** oo qofka loo dhigay isbitaalka sanadkii lasoo dhaafay.
- **Alpha iyo beta thalassemia.**
- **Badalka xubin adke ah**(qofka lagu sameeyay iyo qofka sugaya).

U QALANKA SHAQADA KU SALAYSAN

- **Shaqaalaha daryeelka** caafimaadka iyo shaqaalaha sida joogtada ugu lugta leh daryeelka bukaanada qaba COVID-19.
- **Shaqaalaha adeegga caafimaadka degdegga ah** (Emergency medical service, EMS).
- **Shaqaalaha guryaha** xannaanaynta dadka waayeelka ama naafada ah.
- Shaqaalahaxarumaha kaalmada nololaha.
- Shaqaalaha isbitaalada xanuunada maskaxda ee gobolka.
- Shaqalaaha **guryo kooxeedka, xarumaha deganaanshaha, ama xarumaha** dadka qaba laxaad la'aanta korniinka.
- Shaqaalaha **guryo kooxeedka, xarumaha deganaanshaha, ama xarumaha** ay deggan yihiin dadka qaba khalkhalka xanuunka maskaxda, oo ay ku jiraan khalkhalka isticmaalka balwadaha.
- Shaqaalaha guryaha **gobolka ee ciidamada hawlgabay ee Ohio.**
- Shaqaalaha **dugsiyada xanaanada caruurta-12 aad** ee dhiga waxbarashada fasalka dhaxdiisa ah.
- Dadka ka shaqeeya **adeegyada daryeelka ilmaha** ee xidhiidhka joogtada ah ee tooska ah la leh caruurta ku jirta.
- Dadka ka shaqeeya **adeegyada aaska.**
- Dadka iminka ka shaqeeya **ciidanka bilayska** (ugu yaraan 20 saacadood todobaadkii) ee leh masuuliyadaha gurmada degdegga ah ama kormeerka tooska ah. Tan waxaa ka mid ah:
 - Saraakiisha bilayska.
 - Taliye ku xigeenada.
 - Ciidanka Ilaalada Jidadka Waawayn Gobolka Ohio.
 - Saraakiisha sharciga ee gaarka ah, sida shaqaalaha sharci fulinta Waaxda Ohio ee Khayraadka Dabiiciga ah (Ohio Department of Natural Resources, ODNR), baadhayaasha gudida dawooyinka, wakiilada Xafiiska Baadhida Dambiyada (Bureau of Criminal Investigation, BCI), baadhayaasha dabka gobolka, iyo saraakiisha amaanka gaadiidka federalka iyo saraakiisha kale ee bilayska federalka ee aan heli karayn talaalka federalka.
- Dadka ka shaqeeya **jeelasha**, oo waxaa ku jira dadka la socda maxaabiista la sii daayay, ee siiya adeegyada tooska ah dadka waawayn ama caruurta xidhan ama amar maxkamadeed oo lasoo saaray lagu ilaalinayo.
- Shaqaalaha ka shaqeeya waaxda **dab damiska oo la aqoonsan yahay.**

Waxaa la abuuray Maarso 16, 2021.

Macluumaad dheeraad ah, booqo coronavirus.ohio.gov.

Jawaabaha su'aalaha aad ka qabto COVID-19, wac 1-833-4-ASK-ODH (1-833-427-5634).

Caafimaadkaaga maskaxdu wuxuu muhiim u yahay sida caafimaadka jirkaaga. Haddii adiga ama ehelkaagu aad waajahaysaan walaac la xiriira aafada koronafayras, caawimo ayaa diyaar ah 24 saac maalintii, toddobada maalmood toddobaadkii. Wac COVID-19 CareLine 1-800-720-9616.